# GOLAHA WAKIILADA JSL

## WAAXDA HADAL-QORAALKA IYO GUDIYADA

**Kal-fadhigii 36aad fadhigii 16aad**

**07/04/2018**

**Ajendaha: -** Miisaaniyadda

**Quraanka: -** Md. Maxamuud Axmed Obsiiyey

**Gudoonka: -** Gudoomiye Md.  Baashe Maxamed Faarax

**Ajandaha Fadhiga:-**

- Dooda Miisaaniyadda Qaranka ee 2018

**Gudoomiyaha: -** Mudanayaasha doonaya inay ka qaybgalaan dooda Miisaaniyadda Qaranka ee 2018 ha is qoreen.

**Guddoomiye: waxaan ku soo dhawaynayaa**

**Md. Aadan X. Diiriye Dirir:** shirgudoonka, wakiilada, Saxaafada iyo marti sharaftaba dhamaan waxaan idnku salamayaa salaanta Islaamka, miisaaniyadu inta aanay inoo iman waxaan ogayn in hay'ado badan oo madax banaanaa iyo wasaarado kala madax banaanaa la isku geeyay oo ay ka mid ahaayeen laba Hay'adood ee miino saarku iyo hay'ada Abaabil kasaarka oo wasaarada gaashaan dhiga la hoos geeyay, miisaaniyadana ay ku soo bexeen iyaga oo ka mid ah wasaarada Gaashaandhiga,

Waxaa kale oo la mideeyay labda hay'adood ee kala ah Hay'ada Afooyinka iyo raashinka lagana dhigay mid oo magac kaliya leh, waxayna ku soo bexeen miisaaniyada iyaga oo isku mid ah. Sidoo kale waxaa ka mid ah wasaradaha la mideeyay Wasaarada Ganacsiga, Dalxiiska, warshadaha, oo hal Wasaarad ah laga dhigay.

Waxaa hadaba isweydiin mudan komishankii la odhan jiray shuruucda, waxaa laga ansixiiyay halkan Golaha iyada iyo xeerkeediiba, mana hayno wax lagu baabiiyay oo digreeto madaxweyne ama mid Baarlamaan ah maynaan arag miisaaniyadana kuma jiro, waana hay'ad law reform commission ah oo saacadwalba loo baahan yahay.

**Gudoomiye Baashe:** Xildhibaan Hay'adaas waxaa lagu daray wasaarada Cadaalada.

**Adan Xaji Diriye:** - Gudoomiye kumo jirtee ma adaa ku daray? Taasi waa taa idinkaana ka warami.

Waxaa kale oo jira taagana, ayna markhaati ka tahay Hay'adda shaqaaluhu, kaadhka jinsiyada ee aan ilaa hada laga qaadan SOOL IYO SANAAG qaybo ka mid ah iyada oo hayada shaqaaluhu ay shaqaalaha ku xidhay say kaadhkaa jinsiyada, hana miisaaniyada kama muuqato in dadkaa aan

ka qaadan goboladaa loogu daro miisaaniyada, markaa waxaan so jeedinayaa Golaha, wasaarada Miisaniyada, Wasaarada Arimaha Gudaha in cidii aan qaadan kaadhadhkaa loogu soo daraa khaarashkeedii miisaaniyada.

Waxaa kale oo aan soo jeedinaya Somaliland Dunida Meesha kaliya ee ay ka gashaa waa Ethiopia waxaana inoo jooga nin wakiil ah, waxaa kale oo dhawaan la magacaabay nin inooga wakiil ah EU-da iyada oo labaduba ay hoos yimaadaan Wasaarada Arimaha Dibada, hadana marka aan eegno kharashkeena iyo Dakhligeena in miisaaniyada loogu daraa, ama ha hoosyimaado Wasaarada Arimaha Dibada e waa in loo ansixiyaa Kharash madaxbanaan oo ay ku hawl galaan.

**Mrw. Baar Siciid Faarax: -** waan salaamayaa Golaha, miisaaniyada meelihii looga baahnaa xaqiiqdii in la xoojiyo lama xoojin, waxaana culayku uu saaran yahay meelihii uu awalba saaraanaa oo aad moodaa in lacagtii la sii raray lanna badiyay, sidaasna waxba isma badalayaa hadii aan wixii hore waxba laga badalin oo aan loo eegin baahiyada dalka ka jira.

Anigu waxaan leeyahay ha laga badalo meelihii hore ee la dadajin jiray, ee waa in aan sifiican uga doodnaa waxna ka badalnaa waayo umad ayaynu wakiil kanahay umadiina wey ina sugaysaa baahid badana way jirtaa.

Waxaan soo jeedinayaa oo aan miisaaniyada ka muuqan in gobolada aanay Diwaan galintu ka dhicin miisaaniyada Gooniya loogu daro,  waxaa kale oo aan soo jeediyanaa waxa ay dumarku lahaan jireen school khaas ah, ha noqdeen kuwa wakhtigu u saamixi waayo in ay yaraan wax ku soo bartaan ama kuwo duruufo awgeed ugu bixi waayay in ay galinka hore wax dhigtaan, waad ogtihiin Meesha uu maray schoolkaasi, wasaaraduna waxay balan qaaday in sanadkan dhismaha lagu daro wuuna ka maqanyahay, waxaan soo jeedinayaa in lagu soo daro miisaaniyada.

Waxaad ogtihiin in aan mar labaad iyo mar sadexaadba aan ka hadlay, sida aad ogtihiin Goboladaa bari malaha dhakhtaro waaweyn, oo maalin walba waxaa wadadaa dheer la soo mariyaa dad wax gaadheen siday doonaanba ha u gaadheene waxayna ku soo dhintaan dhexda inta aan meelba la soo gaadhsiin, sida dhacda mar xili walba, waxaan soo jeedinayaa in labadaa gobol dhakhtaradooda mid ahaan la xoojiyo hadii ay tahay qalabka iyo dhismayaashaba oo miisaaniyada lagu daro maadaamo oo aan dadka inagu wakiil kanahay, waayo 1000km ayaa la soo sidaa qof dhaawac ah.

Sida aan soo jeedinay maalmihii aan ka doodaynay arimaha sixir bararka, waxaan soo jeedinay in la xoojiyo Baanka dhexe, in la xoojiyo iska daaye waxbaa laga dhimay oo komishankiisii waxbaa laga dhimay, Dee markaa miyaynaan ku talo galin in Sixir-bararkani Joogsado? Arinkaa komishanka baanka waa in la xoojiyaa ayaan soo jeedinayaa.

Arrinka eeriboodka Ceerigaabo waa sanadii 10aad ee aanu ka hadalo, goboladaa barina dhibaato weyn ayaa ka jirta ee waa in lagu soo daraa miisaniyada oo ay golaha wakiiladu ku soo daraan, waayo dhibaatooyin aad u badan ayaa goboladaa bari ka jirta, meel diyaarada laga raaco waxaa ugu dhaw Hargeisa waanad la socotaan inta ay isu jiraan Hargeisa iyo ceerigaabana intaa ayaan soo jeedinaya aad iyo aad ayaad u mahadsantihiin.

**Md. Cabdilaahi Xuseen Cige:-** shirgudoonka, xildhibaanada, saxaafada iyo martida kale ee sharafta badanba waan salaamayaa, miisaaniyadan waxaad moodaa in ay wakhtigeedii aad ay uga daahday, hadana ay golaha hortaalo waanan qabaa in hore loo sii daayo, aniga oo soo jeedinaya qodobadan in wax laga qabto, sidii warbixintii gudidu soo jeedisay ee ahayd in supplementary budget la keeno, sideedaba Supplementary budgt waxaa la keenaa marka miisaaniyada hore ee aad ku talo galka leedahay aad ogtahay in ay soo wada baxdo, markaas ayaa la keeni karaa.

Qodobada ay soo jeediyeen gudida dhaqaaluhu ee ay ka midka tahay mishiinka bukaanka kalyuhu, kharashka dhismayaasha Dab-damiska ee Burco, Gabiley iyo boorama ogaantay sanadkii horana way ku jireen lamana qaban, markaa waxaan qabaa golaha maanta ayay hor taalaaye awoodna wuu u leeyahaye waa in meelo looga saaraa miisaaniyada si wax looga qabto qodobadaas.

Xeer Lr. 24/2012 ee uu golahani ansixiyay qodobadiisa 42aad, 43aad iyo 44aad waxay sheegayaa in uu sal u yahay miisaaniyada kasta oo la samaynayo iyo xeer kasta oo la dajinayo in tacriifad kasta oo la qaadayaa ay noqoto Shinlinka Somaliland laguna qori karin laguna qaadi karin lacag adag, miisaaniyadan aan haynan waxaa ka mid ah tacriifad Doolar ah, sidoo kale golahan aan fadhino waxaa ka sooo baxay qaraaro 2016 oo odhanaya *“waa in tacriifada iyo miisaaniyada la kala saaraa”* oo uu golahana dib u celiyay tacriifadii miisaaniyada ku jirtay, markaa waxaan soo jeedinayaa in tacriifada miisaaniyada ku jirta xeer lr 24-na la waafajiyo dibna loo celiyo miisaaniyadana laga saaro.

waxaa kale oo aan soo jeedinyaa Hay’adaha aan sharciga lahayn, horana Go’aan gole ayaa uu golahani ka soo saaray, halkana kuma cada tii ay gudidda dhaqaaluhu soo jeedisay oo waxay sheegeen in ay hay’ado aan sharci ahayni ku jiraan, waana in hay’adahaa aan sharciga lahay inta aan miisaniyada aan la helin waa in sharciyadooda degdeg loo helaa ama waa in miisaaniyadooda Wasaarada lagu daraa intaa ka horaysa ay u yihiin Accountable waad mahadsantihiin.

**Md. Cabdiqadir Jaamac Xaamud: -** Shirgudoonka iyo mudanayaashaba waan salamayaa, miisaniayda waxaan taaban doonaa meelo yar-yar oo kooban, sida ay gudidu soo jeedisay waan in dakhliga meel lagu soo ururiyaa, waxa kale oo wadan saameeyay sixir barar, waxaana laga bixi karaa waa in baanka dhexe la awoodeeyaa oo wixii lacag adag ahi ay baanka dhexe ku soo dhacaan sidii hore ay u ahaan jirtay.

Dhanka macalimiinta waa in miisaaniyadooda si gaar ah loo calaamadiyaa waa mihiim waayo iskuuladii way kala horu mareen, waxaana loo baahan yahay in iskuulada dawladu ay active u noqdaan. Dhanka kale hay’adaha aan sharciga lahay ee laga hadlay waa in marka hore golaha la keenaa sharciga hay’adahaa oo ka dib ay miisaaniyada yeeshaan, waanan taageersanahay in miisaaniyadooda la hakiyo lanna keeno sharciyadoodii.

Sidoo kale 2% miisaaniyada ku xusan waxaan soo jeedinaya in la mashaariiceeyo oo tusaale ahaan gobolka sanaag ma lahan anbalaasyo iyo cisbitaalo waana in taa lagu qiimeeyaa si uu dalku hore ugu maro waanad mahadsantihiin.

**Md. Axmed Barkhad Obsiiye:** bismilah, anigu waxaan ka hadlayaa dhawr qodob, waxaanan cabdilaahi ku raacsanahay kala saariyada miisaaniyada iyo korodka tacriifada, waayo hadii laga doodi lahaa tacriifada miisaaniyada ayaa gadaal loo dhigay, waxaanan qabaa in tacriifadaha si fiican looga dooda oo wixii macquul ah lagu daayo wixii kalana laga saaro oo aan miisaaniyada lagu xidhin ayaan qabaa, wasaarada miisaaniyadu khiyaamada aad ayay u taqaanaa oo hadii tacriifada laga hadlo waxay odhanayaan miisaniyadii ayaa la diidayaa, waxanan soo jeedinyaa tacriifada wax ka badalka iyo ay soo raaciyaan miisaaniyada.

Waxaa kale oo inoo yaala in sanadkii hore dakhligiisii ku talo galka ahaa uu 21% uu hoos u dhac ku yimid oo aan la soo xerayn hadana waxaa la ino sheegay in miisaaniyada la kordhiyay 9%, markaa ma waxaa la helay meelo cusub oo laga keeno lacag, markaa sidee ayay isku qabanayaan labadaasi saw sanadaha soo socdna sidan uu noqon mayso oo wax ay baratay miisaaniyadu noqon mayso? Markaa iyada oo aan tii horaba soo wada xeroon, hadan ta danbe la sii kordhiyo saw noqon mayso habartii xaabada qaadi kari weyday ee hadana badhka kale ku soo darsatay maaha, waa in laga waantoobaa taana.

Waxaa kale oo aan qabaa in ay wasaaradu dhiiri galiso sixir bararka waayo tacriifadahaa ay soo sheegeen may sheegin meel kaliya oo shilinka Somaliland lagu qaadayo, waxayna soo qortay in dhamaantood ay yihiin doolar, markaa waxaan leeyahay tacriifadaha waa in lagu qiimeeyaa Somaliland shiling lagana daayaa doolarka.

Waxaa kale oo aan sheegay halkay ku jirto Hay'ada HIV-ADS-ku waxaa ku jirta qalad, oo hadii aad eegtaan Madaxa 21103- Guno xil iyo Guri ayaa ku taal madax xigeenka ku xigana ee ah 21104 waxaa ku qoran Guno Xil iyada oo ay 2017-ka ugu jireen 162,000,000 miisaanaiyada 2018-ka ay ugu jirto 581,000,000 faraqa u dhexeeyaana uu yahay 419,000,000 xaguu ka yimi faraqa intaa le'egee u dhexeeyaa waa in la saxaa ayaan qabaa halkaana oo dhib loogu noqdaa.

Dhanka mushaharka macalimiinta waxay wasaaradu inoo sheegtay in ay kordhisay 20% marna waxay inoo sheegtay 200,000 kun markaa 200,000 ee kun ma iskuwada midbaa macalimiinta oo dhami kii A, B, C, ahaa oo intaa ayaa loo kordhinayaa mise waxa ku qiimaysantahay 20% taana waa in la kala saartaa. Intaa ayaan ku soo koobayaa waxanan soo jeedinyaa in tacriifada laga saaro miisaaniyada, waana in hore loo ansixyaa waad mahadsantihin.

**Md. Ibraahim Axmed Reygal:-** Mahadsanid mudane Gudoomiye, mudanayaal waan idin salamayaa, marka hore miisaaniyada dalka in golahani ansixinayo waa la ogyahay wax laga sii afeeftana maaha, laakiin waxa aan ku kordhinayno hadii ay noqoto gudiddeena Dhaqaalaha iyo dooda xildhibaanada waa in aan awooda saarnaa, sidaa daraadeed ugu horayn waxaan soo jeedinaya gudiddeena dhaqaaluhu aad ayay u mahadsanyihiin hal qodob ayaan aad ugu taageerayaa, kaas oo ah in dhaqaalaha qodobka macalimiinta meelaha lagu taba baro in dhaqaale la galiyo, waana mid aan aad ugu baahanahay.

Ta labaadna waxay tahay soo jeedinta ay soo jeediyeen gudidda dhaqaalaha iyo dooda xildhibaanada waxaan soo jeedinayaa in marka la soo ururiyo wixii loo arko in ay macquul tahay la raaciyo marka miisaaniyada la akhrinayo.

Gudoomiye marka aan u gudbo soo jeedintayda lacagta mudada badan aan maqlaynay ee la yidhaa 2% ee loogu talo galay gobolada bariga lacagtaasi Meesha ay gasho iyo cida la siiyaa marnaba aniga iima cada, xisaab xidhna malaha. Sidaa daraadeed waxaan soo jeedinayaa lacagtaa 2% iyo lacagaha Hay'adaha aan sharciga ahayn waa in lagu daraa lacagta horumarinta, waama in la inoo faah-faahiyaa lacagtaa horumarinta ee 34% waa meelahee meelaha loo qorsheeyay ee dalka ahi?

Waxaan sidaa u leeyahay ma jirto meel ay kaga hadleen oo wax laga waydiiyay golaha Baarlamaanku iyaga oo ka wakiil ah umada, iyada oo ay xukuumad uga masuul tahay meelaha la gaynayo lacagahaa, hadan waa in la inagala tashaa waayo xaq ayaynu u leenahay, waana in la inoo sheegaa oo layidhaa halkaa iyo halkaa ayaa la galinayaa, si ayma buugan ansixiya ayna u noqon.

Qodobka sadexaad waxaan taageerayaa hay'adaha aan sharciga ahayn in sharciyadooda la keena kuwa sharciga leh ee golahani ansxiyayna ee aan la garanayn meel lagu darayna waa in xukuumada ka jawaabto gaar ahaan wasaarada maaliyada, hay'adahaa oo ay ka mid yihiin LRC sida uu xidhibaankii iga horeeyay sheegay, iyada oo la sheegayo in wasaarada cadaalada lagu daray balse aanay miisaniyadooda ka muuqan.

Waxaa kale oo aan taageerayaa mida ah tacriifada in doolar lagu qaado waayo wixii dalka dibada ka soo gala iyo wixii qurba joogu keenaba doolar ayay shirkadaha iyo xawaaladuhuna ku soo qaataaan, markaa maxaa loo daba joogaa inta yar ee ay xukuumada daneheeda ku fushanayso. Sidaa daraadeed ayaan u taageerayaa waanad salaamantihiin.

**Md. Dr Maxamed Axmed Cabdi (Carabayte):-** Shirgudoonka iyo xildhibaanadaba waan salaamayaa, anigu waxaan ka hadlayaa waa dhibaatada dhanka caafimaadka, iyada oo xildhibaanadii iga horeeyay ay xooga saareen dhanka caafimaadka gaar ahaan gobolada Sool iyo Sanaag ee sidii ay sheegaysay xildhibaan baar ee xalay la keenay qaar ka mid ah, hadii aan si kooban u idhaa xukuumadii hore waxay u qortay cisbitaalada Sool iyo Sanaad 4milyan Doolar hadii ay noqoto dhismaha iyo shaqaalihiisaba waxaana hada ay maraysaa laba sano, labadabana waxaa laga dhisay dhisme buluukeeti ah oo waataa dhaawicii iyo hooyadii umulaysay la soo qaadayo, hadii aan maalinwalba wax ka hadalno oo aynaan wixii hore daba galin iyada oo la ogyahay cidii qaadatay walina gacanta ku haysa, Gudoomiye cid aan u xilsaarnay oo wixii ka warhaysana ma jirto waana halka ay ka dhimatay.

Sida aan ka warqabno waxa wasaarada caafimaadka dhaqaajinayaa maaha dhisme oo waa Human Resource dhakhtarka ilaa kal-kaalisada, iyada oo loo hadlay wasaaradii waxbarashada, ciidamada iyada oo wali dhakhtarkeenii weynaa uu qaato $100. Waxaana had iyo jeer dhakhaatiirta lagu canaantaa maxaa cisbitaalada gaar loo leeyahay geeyay, waxaa geeya dhakhtar ceeri gaabi ama laascaanood boqol doolar ku tagayaa ma jiro.

Waxaana ayaan daro ah iyada oo loo kordhiyay loyarada, maxkamadaha, ciidamada wali lama hayo cid tidhaa waar dhakhtarku waxa uu madanyahay ha la siiyo cid tidhaa ma jirto, waxaanad moodaa in wali dhakhtarku uu Somaliland bahal ka yahay.

Wasaaraduna waxay soo qortay dhismayaal iyada oo MCHs kii hore gobolada ay riyuhu u hoydaan, sida ma saajida laga dhismo meelaha aanay cidi daganayn, oo dadku ma yaqaanaan yaa ka shaqaynaya ee waxay yidhaahdaan MCH ha la noo dhiso iyada oo anay jirin qalab iyo cid ka shaqaysaa deedna adhiga ayay ku xeraystaan,

Sida uu khudbadii madaxweynuhu inaa hor jeediyay uu ku sheegay in caafimaadka iyo waxbarashada labadaba laga biin doono gaar u lahaasha oo labadaba dilaya, waxaanad moodaa in wax-barashadii woxoo la isku dayay ee aan wali caafimaadkii dhankiisa cidi eegin, waxaan ku soo koobayaa in waxyaabihii hore ee loogu talo galay goboladaa barina waa in laga daba tagaa, dhanka shaqalaha caafimaadkana waan in wax lagu daraa waad salamantihin.

**Xildhibaan Xasan Xuseen Shide: -** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Shir-guddoonka, Xildhibaanada iyo Saxaafadaba ASC. Bacda sallaan horta intaan odhan lahaa xildhibaanadii iga horeeyey ayaa yidhi, inaan ku sii celceliyana wakhtiga ayey inaga luminaysaa. Ta labaad horta miisaaniyadda wakhtigeedii wuu dhaafay oo saddex bilood ayey maraysaa, waxyaabo badana way inaga xaniban yihiin markaa in horta.

**Waxaan soo jeedinayaa**

- ✓ In deg deg miisaaniyada loo ansixiyo.
- ✓ Waxaan taageersanay in dhisimihii macalimiinta loo wareejiyo macalimiinta oo iyaga la siiyo.
- ✓ Waxaan taageersanahay in lacagtii dhakhaatiirta lagu wareejiyo Xarunta Agoomaha.
- ✓ Tacrifada in Somaliland Shilling lagu qaado waan soo jeedinayaa.

**Guddoomiye:** waxaan ku soo dhawaynayaa

**Xildhibaan Xaamud Cismaan Cigaal**:- Shir-guddoonka, Xildhibaanada, Saaxafad iyo shaqalahaba. Guddoomiye waxaan xasuusinayaa xildhibaanada in markii Wasiirku inoo yimid ee uu inoo qaybiyey Miisaaniyadda, maalintii ka dambaysayna inuu inagu soo noqday in waxyaabo badan la weydiiyey, waxyaabahaas la weydiiyeyna haddana maanta doodan wey ku soo noqonayaa. Waxan ina horyaalaana waa Miisaaniyaddii oo ay tahay in qodob qodob looga doodo ayaa waajibku uu yahay.

Haddii loo baahan yahay waxyaabo la dhaliilayo ama caafimaadka ha ahaato, ama tacliinta ha ahaato. Imika waynu ognahay xeerkii tacliinta oo innaga inaga baxay uu yaalo Golaha Guurtida. Marka aynu ka hadlayno macalimiin wax loo kordhinayo, marka aynu ka hadlayno caafimaad waxa loo kordhinayo aniga waxay ila tahay in dood gooni ah loo furo lagaga doodo.

Waxa timid miisaaniyadda maanta ina hortaala aad iyo aad ayuu Wasiirku ugu mahadsanaa iyadoo caadadii Wasiirada looga bartay inta ay inoo yimaadaan sida ardayda wax inoogu yeedhiyaan oo inta ay inaga baxaan aan waxna la waydiin jirin. Wasiirku wuu inagu soo noqday waan ku bogaadinayaa waanu ina qanciyey su'aalo badan oo aynu waydiinayna wuu ka jawaabay.

**Aniga waxay illa tahay oo aan soo jeedinayaa**

- ✓ In maadaam oo aynu su'aalo Wasiirka waydiinay oo uu inooga jawaabay oo ay miisaaniyadu seddex bilood habsaantay in sidii guddidu soo jeedisay la ansixiyo.

- ✓ In wixii dhimman ee u baahan kordhin sida uu wasiirku sheegay uu Suplementary ku bixiyo imikana miisaaniyadda sidaas ku codayno oo ku siidayno.

**Guddoomiye: waxaan ku soo dhawaynayaa**

**Xildhibaan Cabdilahi Ismaaciil Faarax:-** Guddoomiye, Mudanayaal Aslaamu Calaykum Warax matulaahi Wa Barakaatu. Guddoomiye Doodan saaka socota nin kastaba siday ula eekaatay ayuu ula kacay. Anigu waxaan doonayaa in laba qodob oo kaliya rayigayga ku soo koobo. Hal su'aalana Golaha iyo Guddoomiyahana weydiiyo.

Su'aasha mar dambaydun iiga jawaabiyey. Doodeenani intee in leegbay wax ka badeli karaysaa Miisaaniyaddan la soo sameeyey mise weynu xiiqaynaa'uun? Sidaad la socotaan Miisaaniyaddan maanta ina hortaala Madaxweynuhu markuu Qodbada inoo jeedinaayey iyo markuu ololaha ku jiray uu ka hadlay in dalka baahida ugu weyni tahay cunto oo uu miisaaniyadda ugu badan uu saari doono wax soo saarka iyo Xoolaha iyo Beeraha iyo kalluunka.

Sida Miisaaniyadda ku cad Wasaarada Beeraha Waxa loo soo qoray 13,000,000,000 billion, Wasaarada Ganacsigana waxa loo soo qoray 15,000,000,000 Billion, Wasaarada Isgaadhsiinta iyo Teknoolajiyadda waxa loo soo qoray 18,000,000,000 Billion. Midna raashin iyo Bariistoona looma dirin inay soo saarto. Halkaas waxa is khilaafsan Miisaaniyadda balankii Madaxweynuhu qaaday oo aan ka muuqan.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- Miisaaniyadda ayaan sidan lagu sii dayn ee Wasaaradaha Miisaaniyadda ha u kala qaado, maadaama oo sharcigu kala wareejinta ogol yahay (in the Budget) oonu miisaaniyadda kale meel kale ka keeni karayn, yaan la siidayne ha loo kala qaado siday u kala muhiimsan yihiin. Intaas ku soo koobnayaa WSC.

**Guddoomiye:** waxaan ku soo dhawaynayaa

**Xildhibaan Maxamed Cismaan Bulqaas:-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Shir-guddoonka, Xildhibaanada iyo Saxaafada waan salaamayaa. Walaahi miisaaniyadda in farabadan weynu ka doodnay oo aynaan wax kaga qaban qodobkii 55 la odhan jiray oo inta iska hadalno hadalno la

inaga rasayn waayo oo sidaas miisaaniyadu iskaga socoto. Waxka bedelka aynu xaqa u leenahayna waxba lagama badeli karo, laakiin waynu iska odh odhanaynaa wixii iteelkeena ah wayna iska wad wadaynaa in wax laga bedeli karo, waxna laga dhimmi karo.

**Waxaan soo jeedinayaa**

- ✓ Goluhu xaqbuu u leeyahay inuu wax ka bedelo waxna ku kordhiyo oo aan la odhanuun xagee laga keenayaa Miisaaniyaddan. Tan ku dhex jirta waa in lagu ciyaaro kolba dhinac loo laado sida kuba, oo meeli la arko inay wax ka go'i karaan wax laga gooyo oo Madaxtooyadaa ugu badan oo Wasaarada Maaliyaddaa wax saaran yihiin waan kuwaas laga soo jaraa meelaha u baahan ee aynu sheegi doono loo jaraa.

- ✓ Mashiinadii kalyaha ee Dibadda laga keenay waa in dalka oo dhan la gaadhsiiyaa oo Gobolada loo qaybiyaa waliba kuwa ugu fog fog la gaadhsiiyaa maadaama oo aanay soo gaadhi karayn Hargeisa. Waa in la geeyaa Ceerigaabo oo kale, Badhan oo kale, Laascaanood oo kale, Boorama oo kale iyo Burco oo kale. Kharashkaasna waa in Madaxtooyadu bixisaa oo laga saaraa kharashka Madax lama filaanka ah.

- ✓ Waa in Magaalada ceerigaabo laba dab-damis ah loo iibiya oo casri anaga oo sanad walba ka hadalna iyada oo guryaha ceerigaabo gubtaan markasta, markaa waa in ay Madaxtooyaddu bixisaa oo ka saarta kharashka ku jira Madaxa lama filaanka ah.

- ✓ Dhismaha garoonka Ceerigaabo oo isna kumaan jeer ka hadalnay waa in isagana budget wax looga qoondeeyaa si diyaaraduhu uga soo degi karaan farsamo ahaana wixii laga qaban karo laga qabtaa

- ✓ Samaynta Dekeda laas-qorayna Iyana waa muhiim Madaxweyne Siilaanyan dhagax dhigay seddex sanno ka hor in miisaaniyadda budget lagu soo daro iyadana oo meelaha ugu horeeya laga sameeyo oo 2% ayaab ku filan oo meel ay martaa jirin ayaa ku filnaan lahayd.

- ✓ Waddada ceerigaabo iyo Badhan Iyana waa in Budget lagu soo daraa oo miisaaniyad intaa leeg wax mashruuc ah oo miisaaniyadda ugu jiraa ma jirto.

- ✓ Waxaan leeyahay 2% ayaaba ku filane waddada ceerigaabo iyo Badhan wax ha lagaga qabto oo Putland ayaa xagaas ka soo wada oo haddii aan la samayn dadku Putland ayey noqonayaan yaan la sheegan.

**Guddoomiye:** waxaan ku soo dhawaynayaa

**Xildhibaan Siciid Warsame Ismaaciil: - Bismilaahi Raxmaani Raxiim.** Shir-guddonka, mudanayaasha iyo Saxaafada waxaan idinku salaamayaa sallaanta Islamka Salaamu Calaykum wa Raxmatulaahi Wa Barakaatu.

Marka ugu horaysa waxaan odhan lahaa anigu, Miisaaniyadda markaynu eegayno waa in marka hore la eegaa wixii aynu ka soo saarnay Miisaaniyaddii hore go'aamo. Marka hore waa in aynu eegnaa go'aamadii aynu sanadkii hore soo saarnay maxaa lagu dhaqmay. Waxaad moodaa in labadii sanadood ee u dambeeyey Go'aamadii laga soo saaray aan waxba lagaga dhaqmin.

Markaa doodaynu ka doodnaa iyo go'aamada aynu ka soo saarnaa waxay ogyihiin inay tahay dood bar kuma taal ah oo cidina tixgelinayn.

**Waxay barrigii hore soo saarnay qodobadan:**

- Ugu horayn waxaynu barigii dhawayd ansixinay in hay'addaha aan sharciga lahayn laga saaro.
- In miisaaniyadda la soo Goboleeyo oo qaab Gobolaysan laga dhigo.
- Waxa kale oo aynu nidhi waa in 2% loo soo sameeyaa siyaasad oo 2% la mashaariiceeya. Midna laguma dhaqmin oo iyada oo duuduuban ayaa la keenaa.

Waxaan odhan lahaa miisaaniyada ha la soo waafajiyo miisaaniyada oo ha lagu dhaqmo. Waxa kale oo sharci darro ah oo dastuurku dhigayo sanduuq marka la aasaasayo waxa aasaasaya oo xeer ku soo saaraya Golaha Wakiilada. Meeshan waxa ka buuxa intaas oo sanduuq oo la aasaasayo sanduuq loo aasaasay SONYO, Sanduuq loo aasaasayo Abaaraha. Ma xuma in sanduuq la aasaasaa, laakiin waa in siyaasadiisa iyo xeerka lagu maamulayo Goluhu xeerka soo saaraa.

Kuwa ku jiraa ee Miisaaniyadda ku jiraa qaab sharci darro ayey Miisaaniyadda ugu jiraan waana in laga saaraa mar haddii sharci lagu maamuli lahaa Goluhu aasaasin oo siyaasaddii lagu maamuli lahaan aanay meesha ooli.

Waxaan soo jeedinayaa Sida xildhibaanadii hore sheegeen waxaan leeyahay hay'adaha aan sharciga la lahayn waa in laga saaraa Miisaaniyadda.

Sida aynu ognahay waxa Madaxweynuhu qodobadahiisii iyo kuwiisii ololaha ku daray in uu xooga saari doono Wasaaradaha ama hay'adaha wax soo saarka. Markaanu aragnay oo ku wareegnay wax wax soo saarka wax ka taraya kumaanu arag. Markaa halkeebay salaadu ka xidhmi la dahay.kuma jiraan wax aan is leeyahay wax soo saarkii ayey wax ka tarayaan.

Sidoo kale ma hayno qorshe cadaynaya in wax soo saarku kordhayo iyo qaabkuu u kordhayey oo la raaciyey wasaaradaha wax soo saarka oo aynu odhan karno Iyana Wasaarada Beeraha, Kalluumaysiga iyo xoolaha malaha qorshe cad oo ma hayno.

Waxa kale oo la yaaba Hay'ada la yidhaa qaxoontiga waxay ka mid tahay hay'adaha aan sharciga lahayn waxaanay la miisaaniyad tahay wasaaradaha. Waxay ka mid tahay hay'daha cusub ee aan sharciga la hayn oo ha la raaciyo kuwa miisaaniyadda laga saarayo ee sharciga lahayn.

Waxaad moodaa Wasaarada Ganacsiga oo mashaariic badani ku jirin in Miisaaniyad badan la siiyey oo ay ka badan tahay kuwii la yidhi wax soo saarka. Waxaan odhan lahaa Goluhu inaga oo raacayna siyaasada Madaxweynaha iyo Wasiirka aynu u kala qaadno siday u kala muhiimsan

yihiin oo Wasaarada Ganacsiga ha lagu wareejiyo Wasaarada Beeraha. Wasaarada Kalluumaysiga waxa lacag badani ku qoran tahay gunno xil iyo gunno hawlaha gaar ah wax kulluunka ama wax soo saarka kallunka ahi kuma qorna. Waxa kaliya oo ku qoran mashruuca dekeda kalluunka Dekedaasi meel ay tahayna ma qorna ma Berberaa ma laas-qoraybaa meel ay ku qoran tahayna ma jirto.

Haddii ay Berberana tahay Mashruuc SDF ayaa hore Berbera uga fuliyey Dekeda Kalluumaysiga oo ay dhisan tahay imika, waxa muhiim ah in la cadeeyo Dekedaa yari meesha ay tahay.

Waxaan leeyahay kharashka ku jira gunno hawleedka ha lagu wareejiyo Madax wax soo saarka kalluunka.

Inayana waxa jira cagafyo la soo iibinayo, iyada oo ay jiraan cagafyo hore oo Wasaarada beeruhu soo iibisay meel halkan ah oo koontenar ah ayey ku xidhan yihiin cidi ma isticmaasho, waxa Iyana ka horaysa in la keeno siyaasada Cagafyada lagu maamuli lahaa.

Waxa jira jiray Iyana cagafyo hore oo hay'adda FAO keentay oo dib loo iibiyey, waan in la helaa siyaasad lagu maamulo cagafyada.

Waxa kale oo aan odhan waa in ay ka muuqataa habarta khudaarta iibisay sidii wax qabad dib loogu celin lahaa.

**Waxaan odhan lahaa:-**

- In miisaaniyadan aad looga baaraan dego
- Hay'adaha aynu soo sheegnay sharciyadooda la keeno
- In Golaha la keeno software ay miisaaniyaddu lahay si wax looga bedeli karo.

**Guddoomiye:** waxaan ku soo dhawaynayaa

**Xildhibaan Cabdiraxmaan Cismaan Caalim:** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Xildhibaanada waxaan xasuusin lahaa dawladdani waa dawlad cusub oo imika timid oo baryihii hore waxaynu bixin jirnay waxa la yidhaa hormone oo waxaynu odhan jirnay maadaama oo ay tahay miisaaniyaddii ugu horaysay tixgelin ayeynu siin jirnay.

Anigu eeda oo dhan waxaan saarayaa Guddida Dhaqaalaha inoo qaabilsan 2015,2016 iyo 2017 waxa Guddida Dhaqaalaha ahaa Guddida imika joogta. Dhaqaalaha marka la diyaarinayo waa Guddida tidhaa Goobjoog ayaanu ahayn waa Guddida dhaqaalaha.

Talooyinkii hore iyagaa soo jeediyey tan maantana iyagaa soo jeediyey. Inoo may sheegin in talooyinkoodii hore lagu dhaqmay iyo in kale waxaanay ahayd in marka hore intaanay talooyinkoodan aanay soo jeedin ay toodii hore in lagu dhaqmay iyo in kale ay inoo sheegaan.

Horta guddida ayey hawl badani u taalaa oo ay tahay in ay saxdo oo si wanaagsan inoogu sheegaan iyaga oo dabranayn.

**Waxaan soo jeedinayaa:-**

- ✓ In odoroska miisaaniaydu markeeda horeba ay tahay odoros oo ay khalad tahay in iyada oo aan la ogayn in Miisaaniyaddani soo bixi doonto iyo in kale la yidhaa Suplementray ayaanu samayn doonaa melena caqliyada kamma soo gasho. Waxaan odhan lahaa horta qodobkaa ha laga saaro tallooyinka Guddida. Waxaan leeyahay qodobka lambar 2 iyo labada qodob ee la socdaba ha laga saaro.

- ✓ In sharcigii Goluhu soo saaray la ixtiraamo ee ahaa in tacrifadaha cashuuraha aan dollar lagu qaadin oo shillin Somaliland lagu qaado, laakiin inagaa nidhi tacrifada miisaaniyada laguma soo dari karo oo ka saarnay.

**Guddoomiye:** waxaan ku soo dhawaynayaa

**Xildhibaan Jaamac Xasan Adan: -** Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Horta marka hore waxaan sallaamayaa shir-guddoonka iyo Golahaba. Intaas ka hor hordhac yar Ayaan samaynayaa shir-guddoonku Golaha wakiilada iyo Xildhibaanada inta badani waa Kulmiye oo sanadii hore waxa la odhan jiray shir-guddoonka mucaaridka ayaa ah oo waxbay jiq ku siinayaan ama dooda Ayaan la raacin ayaa la odhan jiray, laakiin haddii ay tahay shir-guddoonka iyo xildhibaanada waa kulmiye iyagaanay masuuliyadu saaran tahay.

**Waxaan soo jeedin lahaa:-**

- ✓ In hay'daha iyo sanduuqyada aan lahayn sharciga laga saaro meesha.
- ✓ Waxa kale oo aan qabaa in lacag badan laga saaro Wasaarada Maaliyadda iyo Madaxtooyada. Lacagaas oo imika ku jira waxa lagu qabanayaana aanay cadayn ama lama filaan ha ahaadaan ama saqnadii oo lagu wareejiyey ha ahaadaane waxa ku jira lacago badan oo aan cadayn waxa lagu qabanayo.
- ✓ Waxaan leeyahay lacagaha laga jaro Wasaarada Maaliyadda iyo Madaxtooyadda ha lagu kabo macalimiinta iyo askarta oo ha la siiyo. Lacagta la leeyahay waa la kordhiyey ee 20% ama 200,000 shillin maaha kuwo ka faynaya macallinka iyo askariga.

- ✓ Macalinka iyo askarigu waxay barrigii hore qaadan kireen wax ka yar $ 100, iyada oo wax kasta lagu iibinayo dollar haddii ay tahay caafimaad, raashin, kirooyin iyo iskuuladii waxbarashada. Xeerarkii dawladu soo saartayna laguma darin wax kasta lagu iibiyo shillinka Somaliland maadaama oo wax kasta lagu iibinayo dollar. 200,000 shillin waa $ 20 oo $ 100 maanta waxuu la qiimo yahay $ 80.

- ✓ Waxaan leeyahay waa in mushaharka loo kordhiyaa Macalimiinta, askarta iyo shaqaalaha oo aan musharah fiican qaadan.
- ✓ Waxaan taageersanay in tababarka macalinmiinta qarash badan la galiyo oo macalimiintu noqdaan kuwo tayo oo dhismayaasha iyo waxan la iska daayo.

- ✓ Guddoomiye aniga oo ka tirsan xildhibaanada Gobolada bariga, waxa sanad kasta miisaaniyada lagu daraa oo xitaa dawladaha hoose laga qaadaa waa 2% oo aan xisaab xidh lahayn oo xitaa dadka Goboladaasi aanay qirsanayn in wax loogu qabtay oo la odhan Karin halkaas iyo kaas ayaa la geliyey oo dayacu ka muuqdo gobolada carriga.

- ✓ Tacrifadaha dollarka lagu qaado Somaliland shilling xitaa hadaynu ansixinayno.

- ✓ Haamaha shidaalka dadka shidaalka u doonta waxa laga qaadaa lacag dollar oo booyad kasta waxa laga qaadaa $20 lacagtaasi waxay ahay lacag qaran oo ku dhacda qasnada dawlada. Dawladdii hore waxay ku wareejisay shirkado lacagtuna waa lacag Qaran ma daynbay ku bixisaa, xisaab xidh malaha, maxaa laga qaaday sanadkii dhawayto,maxaa la inagu lahaa sharciyada loo siiyey in lacagta noocaas loo siiyey maxay tahay taana waa in lagu soo celiyaa qasnadii dawlada.

- ✓ Miisaaniyada wasaarada wax soo saarka sida Kalluumaysiga iyo Xoolaha iyo Beeraha waa in miisaaniyad looga jaraa Wasaarada Maaliyadda iyo Madaxtooyada.

- ✓ 2% waa in la cadeeyo halka ay halka lagu bixiyo oo la mashaariiceeyaa.

- ✓ Waa in miisaaniyadda la Goboleeyaa.

- ✓ Waa miisaaniyadda laga jaro Wasaarada Maaliyadda iyo Madaxtooyada lagu xoojiyaa wasaarada Wax soo saarka.

- ✓ Waa in hay'adaha iyo sanaaduuqda sharciga lahay Miisaaniyadda laga saaro.

**Guddoomiye:** waxaan ku soo dhawaynayaa

**Xildhibaan Maxamuud Dhunkaal Guutaale**:- Bismilaahi Raxmaani Raxiim. Waxaan xildhibaanada xasuusinayaa in Madaxweynuhu qudbadiisii iyo markuu ololaha ku jiray uu yidhi waxaan awooda saarayaa laba qodob oo ah Sinaanta iyo Caddaalada. Waxaan halkan ku arkay in labadii qodob ee uu ku kacay ay ka midyihiin

1. In hay'addo sharci oo laalistooda Goluhu wakiiladu ku shaqo leeyahay meesha uu ka saaray oo xildhibaanaduna hore uga hadleen. Inana la inama odhan xeerkaas aad hay'addaas ku aasaasteen looma baahnee ha la laalo sidii sharciyo hore oo golaha ka soo baxay aynu u laalnay.

2. Waxa Iyana jira hay'ado la aasaasay xeerkaan jiray la odhan jiray xeer Lr.71 oo ka hadlaya kala hadaynta xukumada iyo hay'adaha madax-bannaan oo Golahani ansixiyey. Xeerkaasi wuxuu dhigayaa Madaxweynuhu wuu magacaabi karaa hay'ad, shirkad iyo wakaalad, laakiin la magacaabi karo ilaa samaynayo xeerkii lagu aasaasay iyo waxay qanayso iyo

muddo xileedkeeda iyo cidda ay hoos imanayso. Waajib ayey inagu tahay waxaynu ansixinay hadaynu ka hor nimaadno inagii ayaa sharcigii jabinayna.

Waxyaabaha la sameeyey waxa ka mid ah hay'ado la mideeyey, xeerka lagu mideeyey ma hayno. Waxa jira kuwo la magacaabay oo iskood u taagan, waxa jira kuwo la baabiiyey oo xeerkoodii Maxkadaha yaalo, Xeer-laalinta yaalo, Golaha iyo Madaxtooyaraba yaalo. Waxa jira kuwo miisaaniyadda ku jira oo wax allaale waxay qabanayaan ayeynaan ogayn iyo cidda aasaastay iyo waxa loo aasaasay.

Markaa waa xaaraan in aynu xoolaha ummadda u sii dayno hay'ado aan la garan cidda aasaastay, waxa loo aasaasay iyo sharcigii lagu aasaasay siidayno.

Matalan wasaaradii la odhan jiray Wasaarada dib u dejinta waxay ka koobnayd saddex qaybood

- Qayb waxa lagu daray diiwaanul sakaa.
- Qayb ka mid ahna hay'ada aafooyinka.
- Qaybna waxa laga dhigay hay'ad madax-bannaan.

Qayb kasta waxaynu u samaynay xeerar, xeerarkaas hay'adda aafooyinka oo kaliya ayaa ku qoran imikana waxa lala mataaneeyey kaydka raashinka oo hay'adii samafalka madaxtooyadda ayaa la raaciyey xeerkii lagu mataaneeyey Madaxweynuhu ma soo gudbin inana maynaan samayn.

Hay'adda barakacayaasha ee la aasaasay uma ahyno xeerkii lagu aasaasay guddidu inta ay noqonayso iyo mandate midna ma hayno.

Anigu waxaan adkaynayaa oo horena inta Golaha go'aan uga soo saarnay oo la yidhi muddo 45 cisho gudohood ha lagu soo gudbiyo xeerkoodii intaasna ha ku soo dhaqmeen miisaaniyadda. Waxaan leeyahay cid aan sharci ahayn ayeynaan wax u sharciyeynin oo go'aan aynu halkan ku gaadhnay hadaynu dib u burino inagaa sharcigii burinayna.

Waxaan leeyahay waxaad ku balan qaaday ee ahayd sharcigaa saraynaya adigu ha ugu horayn cidda jabisa. Tacrifadaha Miisaaniyaddo hore ayaa la soo raaciyey inagaa go'aan gole ku soo saarnay inaan la isa soo raacin tacrifadaha iyo Miisaaniyadda. Waxa kale oo Dastuurka ku qoran in aan Golaha la keeni Karin aan laga sharciyeyn Karin waxaan ku qornayeyn afka soomaaliga. Iyada oo ay ku qoran tahay ayeynu ansixinaynaa waana dastuur jabin.

Waxaynu hore isula soo qaadanay oo hore u ansixinay in miisaaniyadda la goboleeyo oo mashaariicda la goboleeyo oo Matalan ma garan karo wixii horumar iyo mushahar ah ee Gobollkayga Sool ugu jira. Mudanayaal iyo Shir-guddoon marka wax aynu go'aan gole ka soo saarnay la idiinkeeno waa in aad u sheegtaan in aynu go'aan gole ka soo saarnay.

Qasnadii Guud ee jirtay ee aynu hore u soo jeedinay ee lama filaanka ahayd oo ileen dalka xaalado deg dega ku iman karee waa la baabiiyey cid baabiisayna ma garanayno meel lacagtii lagu darayna ma naqaano. Lacagta Madaxtooyada iyo wasaarada Maaliyadda ku qoran Matalan Madaxtooyada waxa ku qoran 56,000,000,000 billion korodhka maanta ku kordhay waa

64,000,000,000 billino waxa lagu qabanaya lama garanayo. Iyana Wasaarada Maaliyadda waxa ku kordhay 140,000,000,000 billion saddex jeer laab ayaa lagu daray markii haddii qasnadii lagu daray in la cadeeyey ayey ahayd oo la jajabiyo. Iyana waxa meesha ku jirta guddidii diwaangelinta ee muddo xileedkoodu ahaa 2 sano oo markay dhamaadeen hadan laba sanno oo kale loo kordhiyey oo Iyana dhammaaday ayaa miisaaniyaddi ugu jirtaa.

Waxa jira meelo badan oo wasiirku yidhi cashuuro Ayaan kordhiyey waa xaaraan in cashuur aan golahani ansixinin la qaado. Matalan cashuurta la saaray qaadka iyo sigaarka ma lihi maxaa loo saaray, laakiin waxay ahay in Goluhu ansixiyo waana ta maanta iyada oo dollar ah ku jirta miisaaniyadda Qaranka.

Qododbka 55aad farqadiisa 1aad ee dastuurka iyo qodobka 75aad farqadiisa 5aad ayaa waajibinaaya Miisaaniyadda shaqada aynu ku leenahay iyo sida loogu shaqaynaayo. Markaa waxaan leeyahay oo aan ku soo gunaanadayaa mudanaayaal shir-guddoon waan ixtiraamaynaa idinkuna waxaad ilaalisaan oo ixtiraamtaan go'aamada sharci ee golahan ka soo baxay ee la laalayo.

Madaxweyne waxaan leeyahay adiga iyo xukumadaaduba ayeydaan sharciga faraha ku qaadan oo adigii ayaa wixii umadda u balan qaaday noqday in naad adigu sharciga gacmaha aad ku qaadato. Wa Bilaahi Tawfiiq.

**Xidhitaankii Fadhiga**.

**Guddoomiye:-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim Doodii waa dhamaatay waanu isku soo ururinaynaa doodii codayntiina barribaa la gelayaa fadhiguna waa inoo xidhan yahay.

| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
|---|---|
| **Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI** |
| **------------------------------------------------** | **----------------------------------------** |